



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
WADAJIR DISTRICT COURT  
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/663/2021

TR. 12/10/2021

UJEEDO:-SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, QISMI QAADASHO DHAXAL IYO WAKAALAD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 12/10/2021, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) **Shariif Aadan Cilmi**, Somali ah, Ku Dhashay Galgaduud, Sanadkii 1964, Ina Mayran Xasan Sabriye, oo sita Leesin No.19005/Wasaarada Gaadiidka ee D.F.Somaliya.

2-) **Xasan Aadan Cilmi**, Somali ah, Ku Dhashay Galgaduud Sanadkii 1969, Ina Dhuux Jimcaale Wehliye, oo sita Warqada Sugnaan No.0087804/D/Hoose ee Xamar.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM FAARAX XAAJI CUSMAAN BOOTAN**, kuna geeriyooday Burco September 2017, Waxa kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis iyo Hooyadiis ay Ka geeri horeeyeen, Wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya 1, Xaas, 1, Wiil, 3, Gabdhoo waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

**DADKA:-**

1-Khadiijo	Diiriye	Cali	Degan Hargeysa	Dhalatay 1933	(Xaaskii Marxuumka)
2- Jaamac	Faarax	X.Cusmaan	Degan Hargeysa	Dhashay 1958	(Wiilkii Marxuumka)
3- Sahro	Faarax	X.Cusmaan	Degan Xamar	Dhalatay 1959	(Gabadhii Marxuumka)
4- Caasha	Faarax	X.Cusmaan	Degan Hargeysa	Dhalatay 1961	(Gabadhii Marxuumka)
5- Aamino	Faarax	X.Cusmaan	Degan Xamar	Dhalatay 1969	(Gabadhii Marxuumka)

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa oo Nool ama Geeriyootay haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

**HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.**

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM FAARAX XAAJI CUSMAAN BOOTAN** uu ifka uga tagay 1-Guri ku yaal xamar Degmada (Kaaraan) Lehna **W.M.L.354/84, Tr.02/02/1984** Kana Soo Baxday Maxkamada Degmada Xamar ayna Wada Saxiixayn Kaaliye Cabdi Ducaale Kaahiye iyo Garsoore Dr, C/raxmaan Maxamed Cusmaan, Cabirkiisuna dhan yahay (13,50X13,50)-M lotto.l.r. (5-K) Soodimihiisuna Kala Yihiin Galbeed Waxaa Ka Mara Jid Inta Kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad. 2- Boos Obosiibo ah, uu Ka Dhisan yahay Guryo Jiingado ah "Xaafada Tookiyo" oo Ku Yaal Xamar Degmada H/Wadaag "Xaafada Tookiyo Cabirkiisuna yahay 13X10.M Soodintiisuna tahay Waqooyi Jid Inta Kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad.

**WAKAALADO**

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Kala ah 1-Khadiijo Diiriye Cali 2-Jaamac Faarax X. Cusmaan, 3-Caasho Faarax X. Cusmaan, ay Soo Wakiisheen **Axmed Aadan Cilmi**, Sida Ku Cad **Wakaalad Gaar ah Ref:-XNH/AL/254/2021 Tr.05/10/2021** Soo Baxday Nootaayo Nootaayo Al-Baraka Ee Hargeysa uuna Saxiixay Madaxa Xafiiska Axmed Cabdi Saciid, Sidoo Kale **Sahro Faarax X.Cusmaan** Waxay Maxkamadda Horteeda Ku Wakiilatay **Axmed Aadan Cilmi** Una Wakiisheen Dhamaantood in uu u maamuli karo, dhaxalkoob u samayn karo, xafidi karo, gadi karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi karo, kireyn karo, ka saari karo, saxiixi karo kaalintooda, una doodi karo una dacwoon karo oo qareen u qaban karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUM FAARAX XAAJI CUSMAAN BOOTAN**





**=MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA=**

Shariif Aadan Cilmi



Xasan Aadan Cilmi



**=MASAWIRKA QOF KA MID AH DHAXALTOOYADA=**

Sahro Faarax Xaaji Cusmaan



**=MASAWIRKA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYAD=**

Axmed Aadan Cilmi



QAADASHO QISMI QAYB DHAXALEED.

Sidoo kale Aamino Faarax X. Cusmaan, oo Dhaxaltooyada Ka Tirsan Waxay Qadatay Qismigii Dhaxal ay Ku Lahayd Aabaheed MARXUUM FAARAX XAAJI CUSMAAN BOOTAAN hantida uu Ka tagay oo ah Guriga Dhisan oo Ku Yaal Xamar Degmada Kaaraan iyo Boos Obosiibo ah, oo ay Ka Dhisan yihiin Guryo Jiingado, Sida Ku Cad Warqada Qadashada Qayb Dhaxlay oo ay Qoran tahay Aamino Faarax X.Cusmaan oo Ref Nambarkeedu yahay MDK/284/21 Tr.28/09/2021 Kana Soo Baxday Maxkamadda Degmada Kaaraan ayna Wada Saxiixayn Kaaliye Maxamed Muxyadiin C/llaahi iyo Garsoore Sh.Maxamuud Salaad Cali Waxayna Qismi Dhaxal u qadatay Lacag Dhan US\$.8,630 "Sideed Kun Lix Boqol iyo Sodon dollar" Waxaana Qismigeedii Dhaxal Faraha Ka Saartay oo Qismigeedii Ku Wareegtay Sahro Faarax X.Cusmaan.

DAMIINU MAAL

- Shariif Aadan Cilmi & Xasan Aadan Cilmi, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaalada Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- Shariif Aadan Cilmi

2- Xasan Aadan Cilmi

=SAXIIXA QOF KA MID AH DHAXALTOOYADA=  
Sahro Faarax X.Cusmaan

=SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA=  
Axmed Aadan Cilmi

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiga iyo Booska Obosiibka ah, ee uu Lahaa marxuumka Markay aragtay Wakaalada sare ku xusan, Markay aragtay Warqada Qadashada Qayb Dhaxlayd, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida MARXUUM FAARAX XAAJI CUSMAAN BOOTAAN, oo ay dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Dhamaan Dhaxaltooyada ay Wakiisheen Axmed Aadan Cilmi, uuna Wakiil buuxa u yahay Dhamaan dhaxaltooydda, isla markaana uu awood buuxda u leeyahay ku tasarfka Hantida ay ka dhaxleen Marxuumka sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Qaadasho Qayb Dhaxlayd iyo Wakaalad ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

Dr. Axmed Maxamed Cali



Dawladda Federaalka Soomaaliya  
Wasaaradda Gaadiidka



Federal Republic of Somalia  
Ministry of Transportation

Aqoonsiga Deriskaalka | Driving License



19005

Shariif Aadan Cilmi

Somali

01/01/1964

Mogadishu

D

*Signature*



09/03/2019

08/03/2022



Computer Serial#  
0087804



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO  
MUNICIPALITY OF MOGADISHU

## WARQADDA SUGNAANTA

Certificate of Identity confirmation

DUQA MAGAALDA MUQDISHO WUXUU CADDEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA  
HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QUFKA HOOS KU XUSAN:

*(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears here has the following details:)*

<b>MAGACA</b> Full Name	<b>HASSAN ADAM CILMI</b>
<b>TAARIKHDA DHALASHADA</b> Date of Birth	01-Jan-1969
<b>GOOBTA DHALASHADA</b> Place of Birth	GALGADUUD
<b>NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA</b> ID Number	0087804
<b>JINSI</b> Gender	Male
<b>XAALADA GUURKA</b> Marital Status	Married
<b>DEGGAN</b> Address	Howlwadaag
<b>MAGACA HOYADA</b> Mother's Full Name	DHUUX JIMCALE WEHLIYE
<b>TARIKHDA LA BIXIYEEY</b> Date of Issue	06-Feb-2020
<b>SHAQADA</b> Occupation	EMPLOYEE



Right Thumb Print



**Duqa Magaalada ee Muqdisho**  
Mayor of Mogadishu

**Cumar Maxamuud Maxamed**

*Cumar Maxamuud Maxamed*

